# Waxaad heshay tan.

# Waanu ku taageeri doonaa.



## Taageerada caafimaadka dhalmada laga bilaabo xilliga uurka ilaa wakhtiga hore ee carruurnimada.

Barbaarinta ilmahu waa safar farxad leh isla markaana adag. Kalkaaliyeyaasha Degmada Olmsted waxay halkan u joogaan inay ku caawiyaan, taageeraduna waxaad u heleysaa si bilaash kuugu ah. Laga bilaabo xilliga uurka ilaa wakhtiga hore ee carruurnimada, waxaan kugula joognaa halkan anagoo u mareyna wicitaan, fariin qoraal ah, ama booqashooyin guriga laguugu imaanayo oona kaaga jawaabeyno su'aalahaaga caafimaad, kaa taageereyno maaraynta fayoobi-qabkaaga iyo walbahaarkaada, isla markaana kugu xidheyno ilaha sida barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (Women, Infants, and Children, WIC), Barnaamijka Kaalmada Dheeraadka ah ee Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP), iyo kuwo kaloo badan.

*"Run ahaantii aad ayeey caawinaad iigu lahayd inaan helo aragtiyo iyo talooyin kale, anigoo isla markaasna niyada kasii bixinaya qaar ka mid ah cabsiyadaas iyo walaacyadaas."*

— Evelyn

### Sidee ayay kalkaaliyeyaasha Degmada Olmsted kuu caawiyaan?

Inta lagu jiro xilliga uurka, kadib marka ilmuhu dhasho, iyo ilaa iyo wakhtiga carruurnimada hore, waxaan kuugu soo booqan doonaa gurigaaga ama kuula soo xiriiri doonaa telefoonka ama fariin qoraal ahaan si aan kuugu soo gudbino talooyinka barbaarinta ilmaha, talo ku saabsan caafimaadkaaga jireed, iyo taageero ku saabsan fayoobi-qabidaada.



### Taageeradu waxay u muuqataa sida:

Waxaan adeegsaneynaa waayo'aragnimadeena gaarka noo ah iyo faragelinno la isku halleyn karo si aan dadka uurka leh iyo waalidiinta cusub uga caawinno maaraynta walbahaarka iyo ka hortagga niyad-jabka imaada dhalmada kadib.

- Booqashooyin guri laguugu imaanayo inta lagu jiro xilliga uurka, kadib wakhtiga dhalmada, iyo ilaa xilliga carruurnimada hore.
- Taageerada naasnuujinta
- Talooyinka barbaarinta ilmaha
- Ka caawinta nafisinta walbahaarka
- Ku xidhida ilaha sida WIC iyo SNAP

**Iskaan-garee halkan wixii macluumaad dheeraad ah**

olmstedcounty.gov/ParentSupport

OLMSTED COUNTY MINNESOTA

Public Health
Prevent. Promote. Protect.
Olmsted County

**NALA SOO XIDHIIDH:** 507-328-7570 • PublicHealthHCFIntake@olmstedcounty.gov